

Shaqaalaha Caruurnimada Hore ee Minnesota
(Minnesota's Early Childhood Workforce):

Samaynta Isbadel Sannadaha Hore

Waddooyinka shaqada,
horumarinta xirfadda,
barnaamijyada shahaadada,
Kheyraadka maalgelinta,
sheekooyinka goobta shaqada,
iyo in kale oo badan.



Mahadnaq

Mashruucan waxaa iskaashaday shaqaale ka tirsan Waaxyaha Waxbarashada, Adeegyada Aadanaha, Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota's Departments of Education, Human Services, Health), iyo Golaha Carruurta ee Guddoomiyaha (Governor's Children's Cabinet).

Mashruucan waxaa hogaamiyay:

Kelly Kazeck

Takhasusaha Iskaashiga Shaqaalaha Caruurnimada Hore, Waaxda Waxbarashada (Early Childhood Workforce Collaboration Specialist, Department of Education)

Rachel Blair-Paladino

Xiriiriyaha Isgaarsiinta, Waaxda Adeegyada Aadanaha (Communications Coordinator, Department of Human Services)

Isabella Rolland

Xiriiriyaha Isgaarsiinta Caruurnimada Hore, Waaxda Waxbarashada (Early Childhood Communications Coordinator, Department of Education)

Emma Kurth

Takhasusaha Taageerada Ganacsiga Xannaanada iyo Waxbarashada Hore, Golaha Carruurta ee Guddoomiyaha (Early Care and Education Business Supports Specialist, Governor's Children's Cabinet)

Ka Qaybgalayaasha Hal-abuurka leh:

Naqshadaynta: LN Design Co.

Farsamada Fiidiyowga: MLatino Media



Alaabtan waxaa suurtageliyay iyadoo la adeegsanayo maalgelinta federaalka, 93.434 -ESSA Deeqaha Horumarinta Xannaanada Carruurta ee Dhalashada illaa Shan Sano (ESSA Preschool Development Grants Birth through Five). Waxyaabaha ku jira waa masuuliyada qorayaasha oo keliya mana aha qasab inay metelaan aragtiyaha rasmiga ah ee Xafiiska Xannaanada Carruurta (Office of Child Care), Maamulka Carruurta iyo Qoysaska (Administration for Children and Families), ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (U.S. Department of Health and Human Services).

Wax badan ka ogaw [bogga internetka ee Deeqda Horumarinta Xannaanada Carruurta \(Preschool Development Grant\)](#). Maarso 2026.



Tusmada

4 Waa maxay Shaqaalaha Caruurnimada Hore?

6 Shaqo lagu Faano

8 Waddooyinka Shaqada

Doorarka Heerka Gelitaanka	10
Shahaadada iyo Tababarka	11
Shahaadooyinka La qaato marka la gaaro Kala barka Heerka Koobaad ee Jaamacada	12
Shahaadooyinka Heerka Koobaad ee Jaamacada	13
Shahaadooyinka Sare	14

16 Maalgelinta Shaqadaada

18 Fursadaha Deeqda

20 Saaxiibada iyo Kheyraadka Dheeraadka ah

22 Baahiyaha Shaqaalaha iyo Qodobada Tallaabada

24 Lifaayada

Lifaaqa A: Shahaadooyinka iyo Dibloomada	24
Lifaaqa B: Barnaamijyada Shahaadada La qaato marka la gaaro Kala barka Heerka Koobaad ee Jaamacada	25
Lifaaqa C: Barnaamijyada Shahaadada Heerka Koobaad ee Jaamacada	26
Lifaaqa D: Barnaamijyada Shahaadada Sare	27

Sheekooyinka Goobta Shaqada

- 7 Bixiyaha Qabiilka iyo La-taliyaha Caafimaadka Dhimirka ee Carruurta Sannadaha Hore
- 17 Macallinka Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurta Sannadaha Hore iyo Macallinka Bilowga Hore (Early Head Start Teacher)
- 19 Bixiyaha Xannaanada Carruurta ee Qoyska iyo Macallinka Horumarinta Xirfadda Caruurnimada Hore
- 21 Macallinka Xannaanada Carruurta ee Xarunta iyo Tababaraha Wacyigelinta Waalidka (Parent Aware Coach)

Waa maxay Shaqaalaha Caruurnimada Hore?

Shaqaalaha Caruurnimada Hore waxaa ka mid ah shakhsiyaad ka kala yimid goobo kala duwan oo leh asal iyo waxbarashooyin aad u kala duwan kuwaas oo u adeega carruurta laga bilaabo dhalashada illaa fasalka saddexaad.

Shaqaaluhu waxay isugu jiraan waxbarashada gaarka ah ee carruurta sannadaha hore, macallimiinta dugsiyada hoose, xannaanada carruurta ee ku salaysan guriga iyo xarunta, caafimaadka dadweynaha, dowladda, ururada bulshada, tacliinta sare, iyo in kale oo badan. Goobta Caruurnimada Hore waa mid dhameystiran oo wax walba koobaysa. Kaalin laga qaato xirfaddan waxay bixin kartaa fursado aan la soo koobi karin oo lagu taageerayo carruurta, qoysaska, iyo shabakadaha ku xeeran.



Tusaalaha Jagooyinka iyo Shaqooyinka ee Shaqaalaha Caruurnimada Hore:

- Shaqaalaha Maamulka (Administrative Staff)
- Xirfadlaha Caafimaadka Dhaqanka (Behavioral Health Professional)
- Macallinka Xannaanada Carruurta ee Xarunta (Center-based Child Care Teacher)
- Tababaraha Child Care Aware (Child Care Aware Coach)
- Hogaamiyaha Bulshada
- La-taliye
- Shaqaale Degmo
- Taageere Dhalmada
- Qareenka Caruurnimada Hore
- Takhasusaha Isgaarsiinta Caruurnimada Hore
- Xiriiriyaha Caruurnimada Hore
- Macallinka Qoyska ee Caruurnimada Hore
- Macallinka Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurnimada Hore
- Macallinka (Early Head Start Teacher)
- Macallinka Dugsiga Hoose / Macallinka K-5 (Elementary School Teacher / K-5 Educator)
- Bixiyaha Xannaanada Carruurta ee Qoyska (Family Child Care Provider)
- Bixiyaha Qoyska, Saaxiibka iyo Deriska (Family, Friend and Neighbor Provider)
- Macallimiinta Tacliinta Sare (Higher Education Faculty)
- Booqdaha Guriga (Home Visitor)
- Macallinka Head Start (Head Start Teacher)
- La-taliyaha Caafimaadka Dhimirka Dhallaanka iyo Carruurta Sannadaha Hore (Infant and Early Childhood Mental Health Consultant)
- La-taliyaha Nuujinta (Lactation Consultant)
- Bixiyaha Sharciga ah ee Aan Ruqsadda Lahayn (Legal Nonlicensed Provider)
- Shaqaalaha Barnaamijka Aan Macaash Doonka Ahayn (Nonprofit Program Staff)
- Daaweeyaha Xirfadeed (Occupational Therapist)
- Kaaliyaha Xirfadlaha (Paraprofessional)
- Daaweeyaha Jirka (Physical Therapist)
- Macallinka Xannaanada Carruurta (Preschool Teacher)
- Takhasusaha Horumarinta Xirfadda (Professional Development Specialist)
- Maareeyaha Barnaamijka (Program Manager)
- Kalkaaliyaha Caafimaadka Dadweynaha (Public Health Nurse)
- Cilmi-baare (Researcher)
- Macallinka Pre-K ee Dugsiga (School-based Pre-K Teacher)
- Shaqaale Bulsho (Social Worker)
- Daaweeyaha Hadalka iyo Luqadda (Speech and Language Pathologist)
- Shaqaale Gobol (State Worker)
- Bixiye Qabiil (Tribal Provider) ... iyo kuwo kale oo aad u badan.

Fikrado iyo fursado shaqo oo dheeraad ah, eeg:



[Diiwaanka Qaranka ee Shaqooyinka Caruurnimada Hore ee TEACH \(TEACH National Directory of Careers in Early Childhood\)](#)

[Achieve — Tusaha Shaqada Dadban ee Xarunta Horumarinta Xirfadda ee MN \(MN Center for Professional Development Virtual Career Guide\)](#)



Sheekooyinka Goobta Shaqada



Louisa Lussier
Agaasimaha Hawlgallada iyo U-hoggaansanaanta
Bogga 7



Krisanne Forsman, MS
Faragelinta Hore ee Dhalashada-3/ Macallinka ECSE
Bogga 17



Stacey Boysen
Bixiyaha Xannaanada Carruurta ee Qoyska/Macallinka Horumarinta Xirfadda ee Caruurnimada Hore
Bogga 19



Nikki Lepowsky
Xiriiriyaha Horumarinta Tayada
Bogga 21



Megan Eastman, MSW, LICSW
La-taliyaha Caafimaadka Dhimirka ee Carruurta Sannadaha Hore, Agaasimaha Caafimaadka Carruurta
Bogga 7



Katelyn Maday
Macallinka Caruurnimada Hore ee Head Start
Bogga 17



Kelly Suzick
Agaasime Ku-xigeenka Barnaamijka
Bogga 21

Shaqo lagu Faano

Shaqaalaha Caruurnimada Hore waxay bixiyaan waxbarasho iyo xannaaneyn muhiim u ah guusha hadda iyo mustaqbalka ee gobolkeenna—kaliya maaha carruurta ugu da'da yar reer Minnesota (shaqaalahaheenna mustaqbalka) iyo qoysaskooda, laakiin sidoo kale dhammaan shaqaalaha, ganacsiyada, iyo dhaqaalaha gobolka oo dhan.

Sannadaha ugu horreeya ee nolosha, korriinka maskaxda ayaa ku socda xawaarihii ugu dheereeyay, iyada oo in ka badan 1.000.000 (1,000,000) oo isku-xir maskaxeed cusub ay samaysmaan ilbiriqsi kasta. U-nuglaanshaha luqad qani ah, waayo-aragnimooyin, iyo xiriirro ayaa muhiim u ah in sare loo qaado korriinka maskaxda iyo horumarka marxaladan. Helitaanka barnaamijyo tayo sare leh oo Caruurnimada Hore ah ayaa muhiim ah maxaa yeelay waxay xoojiyaan korriinka maskaxda carruurta. Tayada

barnaamijyadaas waxay ka bilaabataa bixiyeyaal xirfad sarre iyo karti leh kuwaas oo si wax ku ool ah u taageeri kara sifooyinka gaarka ah ee ilmo kasta, oo ay ku jiraan awoodooda, iyo aqoonsiyadooda dhaqan iyo mid luqadeed.

Xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha Caruurnimada Hore waxay leedahay sheeko ka duwan oo ay sheegto, waddo ka duwan oo ay xirfaddan ku soo gashay, hase yeeshee hal mawduuc ayaa isku mid ah: saameynta weyn ee lagu yeelan karo nolosha ilmaha iyo qoyskiisa.



Minnesota waxay aqoonsan tahay baahida loo qabo kordhinta magdhawga iyo dheefaha shaqaalaha gudaha shaqaalaha Caruurnimada Hore. Dadaallo ayaa laga wadaa gobolka oo dhan si loo taageero hindisahan. Faahfaahin dheeraad ah ka baro bogga 22.

“Waxaan u arkaa mudnaan in la iigu yeero qof macallinkiisa ugu horreeya. Aniga ahaan, waxaan 100% ku jiraa ‘booskayga macaanka,’ anigoo maalin kasta waqti la qaadanaya ‘carruurta yaryar’. Waxay igu dhiirrigeliyaan tamartooda, rabitaankooda wax ogaanshaha, iyo dabeecadooda aaminaadda leh. Waxay igu dhiirrigelinaysaa inaan sameeyo inta karaankayga ah si aan u baro si heer sare ah maalin kasta.”

—Leanne, Macallinka Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education Teacher), Taylors Falls

Laga soo bilaabo 2024, 79% qoysaska Minnesota ayaa laga yaabaa inay baahi u qabaan goobaha xannaanada iyo waxbarashada hore.¹



Bixiyaha Qabiilka iyo La-taliyaha Caafimaadka Dhimirka ee Carruurta Sannadaha Hore

★ Minneapolis, MN

Louisa Lussier

Agaasimaha Hawlgallada iyo U-hogaansanaanta, Baby's Space

Shaqada Louisa ee shaqaalaha Caruurnimada Hore waxay bilaabatay kaddib markii ay heshay gunno ay isku xilqaanto. Baro sida ay u adeegsato taageerada bulshadeeda si ay u daryeesho carruurta iyo qoysaska.

Megan Eastman, MSW, LICSW

La-taliyaha Caafimaadka Dhimirka ee Carruurta Sannadaha Hore, Agaasimaha Caafimaadka Carruurta, Kiliinikada Caafimaadka ee Mino-Bimaadiziwin (Mino-Bimaadiziwin Wellness Clinic)

Megan waxay taageertaa carruurta iyo daryeelayaasha Red Lake Nation iyo wixii ka baxsan ee ku yaalla Aagga Magaalooyinka Mataanaha ah (Twin Cities Metro Area). Daawo sheekadeeda si aad wax badan uga ogaato waddooyinkii ay qaaday si ay u gaarto yoolalka shaqadeeda gudaha goobta caafimaadka dhimirka.

“Waxaan ahaa hooyo aad u da' yar waxaana ka faa'iideystay barnaamijyada bulshada. Waxaa la ii yaboohay gunno si aan isku xilqaamo. Xiisahayga ayaa aad u furmay si aan u ogaado waxa ay samaynayaan, sababta ay u samaynayaan.”

—Louisa Lussier



Dhegeyso sheekooyinkooda:

Guji ama iskaan garee QR koodhka hoose si aad ugu dhegeysato sheekooyinka Louisa iyo Megan af-Ingiriis ama af-Isbaanish.



Waxaa jira qaabab badan oo loogu biiri karo loona kobcin karo shaqada Caruurnimada Hore.

Doorarka heerka gelitaanka ee Caruurnimada Hore, shahaadooyinka, horumarinta xirfadda, iyo tacliinta sare waa dhammaan waddooyin la sahamin karo si ay kaaga caawiyaan inaad gaarto jagooyinka aad rabto. Marka lagu daro waayo-aragnimada goobaha sida waxbarashada iyo horumarinta carruurta, dad badan ayaa ku biira shaqaalaha Caruurnimada Hore iyagoo raacaya waddooyin aan dhaqameed ahayn, iyagoo leh asalyo dhinacyo ay ka mid yihiin juqraafiga, barashada cilmiga dadka (anthropology), xisaabta, caafimaadka dadweynaha, iyo in kale oo badan. Waxay ku xiran tahay qof kasta inuu go'aamiyo haddii, goorta, iyo sida uu u rabo inuu ugu dhex socdo goobta.

Tusaale waddada shaqada:

Waxaa jira baro bilow oo badan oo kala duwan oo loogu biiri karo shaqaalaha Caruurnimada Hore. Waddada halkan lagu muujiyay waxay ka bilaabataa jago heerka gelitaanka ah, laakiin tillaabooyinka xiga waxay noqon karaan baro bilow sidoo kale.

Doorarka Heerka Gelitaanka
— Eeg bogga 10 —

- Caawiye ku sugan Guriga Xannaanada Carruurta ee Qoyska
- Kaaliyaha Fasalka ee Xarunta Xannaanada Carruurta ama Head Start
- Kaaliyaha Fasalka ee Barnaamijka Waxbarashada Hore ee Dugsiga ku Salaysan


✓ Bar bilow kasta, waxaa jira fursado horumarin xirfadeed kuwaas oo horseedi kara in la kordhiyo heerarka aqoonta iyo kartida.

Shahaadada iyo Tababarka
— Eeg bogga 11 —

- Kaaliyaha Xannaanada Carruurta (Child Care Assistant)
- Kaaliyaha Waxbarashada (Education Assistant)
- Taageere Dhalmada

“Waxaan jeclahay inaan wax baro qoysaska si ay ugu doodi karaan naftooda qolalka dhalmada ama kiliinikada. Waxaan si xoog leh u danaynayaa ka caawinta qoysaska inay helaan xilliga dhalmada kadib kii ugu fiicnaa ee suurtagal ah.”

—Rhonda, Taageere Dhalmada (Birth Doula) iyo Macallinka Dhalmada, Twin Cities



“Waxaan takhasus u lahaa Juqraafiga (Geography) kadibna waxaan ka qalin jebiyay shahaadada mastarka ee Siyaasadda Dadweynaha (Public Policy). Waxaan xiiseeyaa arrimo bulsho oo badan waxaana si dhab ah u aaminsanahay meesha aan ka sameyn karo isbeddelka ugu weyn in ay tahay Caruurnimada Hore. Waxaan ka bilaabay Waaxda Waxbarashada (Department of Education) anigoo ka shaqeynaya Caruurnimada Hore anigoo ah tababarte (intern) ilaa iyo xilligaasna halkaan ayaan joogay.”

—Amanda, Maareeyaha Deeqda Horumarinta Xannaanada Carruurta (Preschool Development Grant Manager), Minneapolis/Gobolka oo dhan

Shahaadooyinka Associate (Associate's Degrees)
— Eeg bogga 12 —

- Macallinka Dhallaanka/Carruurta Socod-baradka ee Xarun ama Head Start (Infant/Toddler Teacher in a Center or Head Start)
- Macallinka Xannaanada Carruurta ee Xarun ama Head Start (Preschool Teacher in a Center or Head Start)
- Kaaliyaha Xirfadlaha (Paraprofessional) ee Barnaamijyada Dugsiga ku Salaysan

Shahaadooyinka Bachelor (Bachelor's Degrees)
— Eeg bogga 13 —

✓ Nooc kasta oo macallin wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa taageerada carruurta iyo qoysaska.

- Macallinka Hogaanka Fasalka (Lead Classroom Teacher)
- Tababaraha Horumarinta Xirfadda (Professional Development Trainer)
- Booqdhaha Guriga (Home Visitor)

Shahaadooyinka Sare (Advanced Degrees)
— Eeg bogga 14 —

- Maamulaha Dugsiga (School Administrator)
- Takhasusaha Caafimaadka Dhimirka ee Carruurta Sannadaha Hore (Early Childhood Mental Health Specialist)
- Maktabadaha Carruurta (Children's Librarian)
- La-taliyaha Dugsiga (School Counselor)



Doorarka Heerka Gelitaanka

Shaqaa badan oo Caruurnimada Hore ayaa ka bilaaba jagooyinka heerka gelitaanka waxayna u dallacaan jagooyin heer sare ah iyagoo ku daraya aqoonsiyo, shahaadooyin, iyo horumarin xirfadeed. Dad badan ayaa sidoo kale xiisahooda shaqada Caruurnimada Hore ka hela khibrad toos ah.

Waxaa jira waddooyin badan oo loogu biiro shaqaalaha Caruurnimada Hore. Waxaad ka bilaabi kartaa da' kasta ama heer khibradeed kasta.

Tusaalaha Jagooyinka Heerka Gelitaanka:

- Xannaaneeye/Nanny
- La-taliyaha Xeryaha (Camp Counselor)
- Kaaliyaha Fasalka ee Xarunta Xannaanada Carruurta ama Head Start
- Kaaliyaha Fasalka ee Barnaamijka Waxbarashada Hore ee Dugsiga ku Salaysan
- Caawiye ku sugan Guriga Xannaanada Carruurta ee Qoyska
- Kaaliyaha Xirfadlaha (Paraprofessional)
- Hoggaamiyaha/Agaasimaha Madadaalada
- Shaqaale Dhallinyaro



Sii sahmi doorarka heerka gelitaanka iyo doorashooyinka shaqada Caruurnimada Hore adoo u maraya [Tusaha Shaqada Dadban ee Achieve MN \(Achieve MN's Virtual Career Guide\)](#).



Ma xiisaynaysaa shaqada daryeelka carruurta ama waxbarashada Caruurnimada Hore? Eeg barnaamijka [Empower to Educate](#):



“Ka shaqeynta carruurta tan iyo yaraanteydii waxaan oгаа inaan rabo inaan si fiican wax u baro, oo aan caawiyo carruurta yaryar. Carruur haynta yaraanteyda waxay horseedday inaan yeesho jacayl intaas le'eg oo aan u qabo carruurta.”

—Brooklyn, Macallinka Xannaanada Carruurta (Preschool Teacher), Plainview



Shahaadada iyo Tababarka

Kaddib jagooyinka heerka gelitaanka ee Caruurnimada Hore, shaqaale badan oo xiiseynaya inay u gudbaan tillaabada xigta ee shaqadooda waxay fiiriyaan shahaadooyin iyo aqoonsiyo kale. In kasta oo tacliinta sare aan had iyo jeer loo baahnayn, aqoonsiyada Caruurnimada Hore waxay furi karaan albaabka jagooyin dheeraad ah.

Waxaa jira xulashooyin aqoonsi oo badan gudaha gobolka Minnesota. Fursadaha soo socda ee tooska ah (online) iyo kuwa fool-ka-foolka ah waxay bixiyaan fikrad ku saabsan shahaadooyinka aad heli karto si aad kor ugu qaaddo taariikhdaada shaqo (resume). Intaas waxaa dheer, kuleejyo badan oo farsamada iyo bulshada ah ayaa bixiya koorsooyin 1-sano (1-year) ah oo ku saabsan Caruurnimada Hore iyo Horumarinta Ilmaha.

“Maba ku jirin waxbarashada haba yaraatee illaa horraantii 30-meeyadii, kaddib markii uu dhashay ilmahaygii ugu horreeyay. Waxaan qaatay fasal cajiiib ah oo ku saabsan dhalmada dabiiciga ah, iyo kaddib markii aan maray geeddi-socod dhalmo oo la yaab leh oo awood i siiyay, waxaan tababartay inaan bixiyo koorsooyin la mid ah.”

—Jennifer, Macallinka Waalidka ECFE (ECFE Parent Educator), Rochester iyo Lake City

Tusaalaha Shahaadada iyo Fursadaha Tababarka

Liis weyn oo shahaadooyin iyo shahaadooyin xirfadeed ah, eeg [Lifaafa A ee bogga 24](#).

1 Child Development Associate® (CDA)

Aqoonsiga Child Development Associate® (CDA) wuxuu noqon karaa tillaabo muhiim ah waddooyinka shaqada ee Caruurnimada Hore. Aqoonsigani wuxuu siinayaa shakhsiyadka aqoonta aasaasiga ah ee horumarinta ilmaha. Ka qaybgalayaashu waa inay dhammaystiraan 120 (120) saacadood oo waxbarasho ah iyadoo ay weheliso 480 (480) saacadood oo khibrad shaqo ku salaysan ah, horumariyaan faylka shaqada (portfolio), ayna ka qaybgalaan kormeer rasmi ah iyo imtixaan.

Booqo [Golaha Aqoonsiga Xirfadleyda \(Council for Professional Recognition\)](#) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan is-diiwaangelinta iyo maalgelinta la heli karo. Fiiro gaar ah: Dhowr kuleejyo gobolka MN ah ayaa aqbali doona CDA-ga si loogu beddelo dhibco (credit) waxbarasho hore.

CDA, shakhsiyadku waxay u qalmi karaan jagooyinka sida:

- Kaaliyaha Xannaanada Carruurta
- Kaaliyaha Waxbarashada
- Kaaliyaha Fasalka

2 Aqoonsiga Kaaliyaha Xirfadlaha ee Ikhtiyaariga ah (Voluntary Paraprofessional Credential)

Guddiga Shatiyeynta iyo Heerarka Macallimiinta Xirfadda leh ee Minnesota (Professional Educator Licensing and Standards Board - PELS) wuxuu siiyaa kaaliyayaasha xirfadlayaasha ee Minnesota [Aqoonsiga Kaaliyaha Xirfadlaha ee Ikhtiyaariga ah \(Voluntary Paraprofessional Credential\)](#) kaas oo aqoonsanaya tababar dheeraad ah iyo diyaar-garowga la shaqeynta ardayda.

3 Tababarka Montessori (Montessori Training)

Montessori waa hab waxbarasho oo ku saleysan dhaqdhaqaaq is-haga, wax-ka-barasho gacan-qabasho ah, iyo ciyaar iskaashi. Fasalka Montessori, carruurta waxay sameeyaan xulashooyin hal-abuur leh oo ku saabsan waxbarashadooda, halka fasalka iyo macallinka tababaran ee heerka sare ah ay bixiyaan waxqabadyo ku habboon da'dooda si ay u hagaan nidaamka. Carruurta waxay u shaqeeyaan koox ahaan iyo shakhsi ahaanba si ay u ogaadaan oo u sahamiyaan aqoonta adduunka.

Booqo [Xarunta Montessori ee Minnesota \(Montessori Center of Minnesota\)](#) iyo [Bulshada Montessori ee Mareykanka \(American Montessori Society\)](#) si aad wax badan uga ogaato tababarka iyo barnaamijyada waxbarashada macallimiinta.

4 Shahaadada Doula (Doula Certification)

Hadafka doula waa inay taageerto qofka umulaya, ilmahooda, iyo qoyskooda inta lagu jiro geeddi-socodka dhalmada. Waxaa jira dhowr nooc oo kala duwan oo doula ah, oo ay ku jiraan taageere dhalmada (birth doula) iyo taageere dhalmada kadib (postpartum doula). Barnaamijyada shahaado-bixinta waxay u dhexayn karaan dhowr bilood illaa 2 sano iyo ka badan (2+ years), laakiin badiyaa waa kuwabaacsan maadaama ka qaybgalayaashu ay ka shaqeynayaan in la buuxiyo shuruudaha. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health) waxay leedahay liiska [ururada bixiya shahaadada doula](#) oo la eegi karo si wax badan looga ogaado iyo si isku diiwaangeliyo barnaamij.

5 Waddada Tababarka Laba-geesoodka ah ee Xannaanada Carruurta (Child Care Dual-Training Pipeline)

Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota (Department of Labor and Industry) waxay ku daraysaa xannaanada carruurta sidii warshadaha leh waddada tababarka laba-geesoodka ah (dual-training pipeline industry). Tababarka laba-geesoodka ah waa hab wax-ka-shaqeyso-inta-aad-wax-baranaysid ah halkaas oo loo-shaqeeyuhu ku maalgeliyo shaqaalihiiisa asigoo siinaya tababar ku saabsan xirfadaha shaqo ee ku salaysan kartida iyo tilmaamaha la xiriira. Si uu shaqaaluhu ugu qalmo barnaamijka tababarka laba-geesoodka ah, waa inuu:

1. Uu u shaqeeyo loo-shaqeeyaha ka qayb qaadanaya tababarka laba-geesoodka ah iyo,
2. Laga aqballo barnaamijka tababarka laba-geesoodka ah ee loo-shaqeeyaha kaas oo buuxinaya heerarka kartida warshadaha ee xirfad gaar ah.

Faahfaahin dheeraad ah ka baro [Barnaamijka Dhuunta Tababarka Laba-geesoodka ah \(Dual-Training Pipeline Program\)](#).

Sii Sahami!



Eeg bogga internetka ee [Develop](#) wixii khuseeya Kheyraadka horumarinta xirfadda dheeraadka ah iyo

tababarrada loogu talagalay xirfadlayaasha daryeelka qoyska, bixiyayaasha xannaanada carruurta, iyo macallimiinta hore.



Shahaadooyinka Associate

Waxbarasho dheeraad ah oo ka baxsan shahaadooyinka ayaa ka caawin karta dadka xiiseynaya shaqaalaha Caruurnimada Hore inay gaaraan heerka xiga ee shaqooyinka. Shahaadooyinka associate-ka (Associate's degrees) waa shahaadooyin labo sano ah oo bixin kara waddo loo maro shaqada taas oo noqon karta mid ka dhaqso badan kana raqiisan barnaamijyada shahaadooyinka kale. Mararka qaarkood, dadku waxay shahaadadooda ku kasbadaan xawligooda u gaarka ah.

Kuleejyo badan oo Gobolka Minnesota ah ayaa bixiya shahaado labo sano ah oo diiradda saaraya horumarinta ilmaha/Caruurnimada Hore. Barnaamijyada qaarkood waxay bixiyaan [Waddada Beddelka MN \(MN Transfer Pathway\)](#) si ardaydu u dhameystiraan shahaadada associate ayna ugu beddelaan heerka sannadka saddexaad (junior-year) Jaamacad Goboleedka Minnesota (Minnesota State University) iyagoon lumin dhibcaha ama qaadan koorsooyin dheeraad ah.

Shahaadada associate waxay kaa caawin kartaa inaad hesho jago ah:

- Macallinka Dhallaanka/Carruurta Socod-baradka ee xarun ama Head Start
- Macallinka Xannaanada Carruurta (Preschool Teacher) ee xarun ama Head Start
- Kaaliyaha Xirfadlaha (Paraprofessional) ee barnaamijka dugsiga ku salaysan
- Booqdaha Guriga (Home Visitor)
- Kormeeraha Barnaamijka Cuntada (Food Program Monitor)
- Iyo in kale oo badan



Sii sahmi fursadaha Caruurnimada Hore ee lagu heli karo shahaadada associate ee bogga [internetka ee Achieve](#) ama [bogga internetka ee Sahaminta Shaqada ee Gobolka Minnesota \(Minnesota State's Career Exploration website\)](#).

- ★ **Barnaamijyada Shahaadada (Degree Programs)**
Eeg [liiska MN Child Care Aware ee kuleejyada iyo jaamacadaha la ansixiyay](#) si aad u aragto liiska hay'adaha bixiya shahaadooyinka associate, ama eeg Lifaaqa B ee bogga 25.

- ★ **Maalgelinta Shaqadaada**
Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan maalgelinta waxbarashadaada, booqo bogga 16.

“Waxay igu qaadatay 10 sano inaan helo shahaadada associate-ka ee Caruurnimada Hore. Waxaan jeclahay ka shaqeynta carruurta... Taladeydu waxay noqon lahayd inay tahay shaqo badan. Laakiin abaalmarinta daawashada korriinka ayaa u qalanta dhammaanteed.”

—Angie, Macallin, Chisago City



Shahaadooyinka Bachelor

Shahaadooyinka bachelor-ka waa shahaadooyinka jaamacadeed ee ugu horreeya ee ay bixiyaan kuleejyada iyo jaamacadaha. Barnaamijyadu inta badan waxay qaataan 4 sano, in kastoo ay u dhexayn karaan meel kasta laga bilaabo 3-6 sano. Shahaadada bachelor-ka ee diiradda saarta cilmiga Caruurnimada Hore waxay siisaa shakhsiyaadka dabacsanaanta inay ka shaqeeyaan goobo Caruurnimada Hore ah oo kala duwan.

Ardaydu sidoo kale waxay raadsan karaan barnaamij ay ku jirto shatiga macallinka ee Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurnimada Hore (Early Childhood Special Education), iyo/ ama Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education) (Dhalasho-Fasalka 3).



Shahaadada bachelor waxay kaa caawin kartaa inaad hesho jago ah:

- Macallinka K-6
- Sarkaalka Taageerada Ilmaha (Child Support Officer)
- La-taliyaha Ilmaha/Qoyska (Child/Family Counselor)
- Macallinka Hogaanka (Lead Teacher) ee xarun ama Head Start
- Macallinka Waxbarashada Gaarka ah (Special Education Teacher)
- Tababaraha Horumarinta Xirfadda (Professional Development Trainer)
- Kalkaaliye Diiwaangashan ama Khabiir Nafaqo (Registered Nurse or Nutritionist)
- Iyo in kale oo badan

Fiiro gaar ah: Jagooyinka qaarkood waxay u baahan yihiin aqoonsiyo dheeraad ah.



Sii sahmi fursadaha Caruurnimada Hore ee lagu heli karo shahaadada bachelor ee bogga [internetka ee Achieve](#) ama [bogga internetka ee Sahaminta Shaqada ee Gobolka Minnesota \(Minnesota State's Career Exploration website\)](#).

“Waxaan dhigtay Kuleejka Concordia-Moorhead, waxaan ku qalin jebiyay shatiga K-6 iyo Dhalashada-Fasalka 3. Waxaan jeclahay inaan qayb ka noqdo dhammaan waxbarashada ay ardaydu sameeyaan sanadka oo dhan—waxay bartaan xirfado nololeed oo aad u badan da'dan.”

—Xiriiriyaha Caruurnimada Hore iyo Macallin, Ogilvie



“Waxaan ku qalin jebiyay shahaadada BA ee Cilmi-nafsiga iyo Horumarinta Qoyska ee Caruurnimada Hore. Waxaan ka shaqeynayay Head Start, Preschool, iyo ECFE 37 sano ee la soo dhaafay welina waxaan JECLAHAY DOORKAYGA qoysaska!”

—Macallinka ECFE/Macallinka u Diyaargarowga K/Macallinka Pre-K, Chisago Lakes

- ★ **Barnaamijyada Shahaadada (Degree Programs)**
Eeg [liiska MN Child Care Aware ee kuleejyada iyo jaamacadaha la ansixiyay](#) si aad u aragto liiska hay'adaha bixiya shahaadooyinka Bachelor, ama eeg Lifaaqa C ee bogga 26.

Faahfaahin dheeraad ah ka baro shatiyeynta macallimiinta adoo u maraya [Guddiga Shatiyeynta iyo Heerarka Macallimiinta Xirfadda leh \(Professional Educator Licensing and Standards Board\)](#).

- ★ **Maalgelinta Shaqadaada**
Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan maalgelinta waxbarashadaada, booqo bogga 16.



Shahaadooyinka Sare

Shahaadooyinka sare ee cilmiga Caruurnimada Hore, hoggaanka waxbarashada, iyo shatiyeynta waxay ka caawiyaa shaqaalaha Caruurnimada Hore inay sii koraan oo horumaraan. Barnaamijyada noocan oo kale ah waxay bixiyaan fursado aan kaliya ku ekeyn xirfadaha xannaanada iyo waxbarashada hore laakiin sidoo kale tacliinta sare, hoggaaminta, u-doodista, iyo in kale oo badan.

Shahaadooyinka mastarka (Master's degrees) waa shahaadooyin la qaato qalin-jabinta kaddib kuwaas oo muujinaya inaad heshay aqoon iyo xirfado sare. Barnaamijyadu inta badan waxay qaataan 2 sano. Shahaadooyinka dhakhtarnimada (Doctorate degrees) waa shahaadooyin la qaato qalin-jabinta kaddib oo inta badan la bixiyo ka dib sannado badan oo dugsiga qalin-jabinta ah, iyadoo waqtiga shahaadada uu ku xiran yahay barnaamijka.



Shahaadada mastarka (master's degree) waxay kaa caawin kartaa inaad hesho jago ah:

- Takhasusaha Caafimaadka Dhimirka Dhalaanka iyo Caruurnimada Hore
- Maktabadaha Carruurta (Children's Librarian)
- Macalinka Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurnimada Hore
- Cilmi-baaraha Waxbarashada
- Daaweeyaha Qoyska
- Takhasusaha Horumarinta Ilmaha
- La-taliyaha Dugsiga (School Counselor)
- Daaweeyaha Xirfadeed ama Daaweeyaha Jirka
- Macalinka Waalidka
- Daaweeyaha Hadalka iyo Luqadda (Speech and Language Pathologist)
- Maamulaha/Agaasimaha
- Iyo in kale oo badan

Shahaadada dhakhtarnimada (doctorate degree) waxay kaa caawin kartaa inaad hesho jago ah:

- Dhakhtarka Dhimirka Carruurta
- Barfasoorka Caruurnimada Hore (Kuleejka ama Jaamacadda)
- Cilmi-baaraha Waxbarashada Caruurnimada Hore
- Falanqeyaha Siyaasadda
- Iyo in kale oo badan



Sii sahmi fursadaha Caruurnimada Hore ee lagu heli karo shahaadada sare bogga [internetka ee Achieve](#).

★ **Barnaamijyada Shahaadada (Degree Programs)**
Eeg liiska barnaamijyada shahaadooyinka sare ee ku jira Lifaaga D ee boga 27.

★ **Maalgelinta Shaqadaada**
Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan maalgelinta waxbarashadaada, booqo boga 16.

“Kadib qiyaastii 10 sano oo aan dhigayay waxbarashada dhalmada, waxaan go'aansaday inaan u wareego ka shaqaynta waalidiinta kadib dhalashada ilmahooda (rruurtooda), sidaas darteed waxaan dib u laabtay si aan u helo shahaadada M.Ed ee waxbarashada waalidka iyo qoyska.”

—Jennifer, Macalinka Waalidka ECFE (ECFE Parent Educator), Rochester iyo Lake City



Waxaa jira waddooyin shaqo oo aan la soo koobi karin oo laga dhex helo shaqaalaha Caruurnimada Hore.

Waddooyinka hoos lagu muujiyay waxay matalayaan dhowr ka mid ah Ikhtiyaarada badan ee u furan dadka ka tirsan shaqaalaha Caruurnimada Hore. Meel kasta oo aad ka bilowdo ama ku dhameyso safarkaaga, raadi fursadaha sida ugu fiican ula socda yoolalkaaga iyo danahaaga gaarka ah.

✓ *Waad ku biiri kartaa waadna sii wadan kartaa shaqaalaha Caruurnimada Hore adigoo leh khibrado asal oo badan oo kala duwan.*



✓ *Ma jiro dhamaad adag oo ku saabsan horumarinta shaqada Caruurnimada Hore. Si kasta oo ay tahay waddada aad doorato, waxaa jira fursado taageero oo la heli karo.*

“Waxaan haystaa shahaadada AAS ee Caruurnimada Hore, shahaadada AA ee Waxbarashada Guud, shahaadada BS ee Madadaalada Isboortiga iyo Maareynta, Shatigeyga Agaasimayaasha Waxbarashada Bulshada, shahaadada Master's ee Hoggaanka Waxbarashada, iyo shatigeyga Macallinka Waalidka... Waxaan jeclahay in maalin kasta ay tahay mid ka duwan.”

—Roxy, Agaasime Ku-xigeenka Waxbarashada Bulshada/Waxbarashada Hore, Proctor iyo Hermantown

Maalgelinta Shaqadaada

Xulashooyin taageero maaliyadeed oo kala duwan ayaa diyaar u ah dadka xiiseynaya dhammaan noocyada shaqooyinka Caruurnimada Hore.



Fiiro gaar ah: Kani ma aha liis dhameystiran oo ah taageerada maaliyadeed ee la heli karo— marka lagu daro fursadaha hoos ku taxan, si toos ah ula hubi wakiilada barnaamijkaaga, shatiga, ama shahaadada aad xiisaynayso si aad wax badan uga ogaato kaalmada maaliyadeed.

• Deeqaha Waxbarasho ee TEACH (TEACH Scholarships)

TEACH Early Childhood® Minnesota waa barnaamij deeq waxbarasho ah oo ka caawiya macallimiinta Caruurnimada Hore iyo kuwa da'da dugsiga inay kordhiyaan heerarkooda waxbarasho, magdhawgooda, iyo ballan-qaadkooda goobta iyagoo kasbanaya dhibcooyinka kuleejka (college credits) iyo shahaadooyin. Waxaa jira laba nooc oo deeq waxbarasho ah oo la heli karo:

– Deeqda Waxbarasho ee Macallinka Caruurnimada Hore ama Daryeelka Da'da Dugsiga

Bixiyeyaasha xannaanada carruurta ee qoyska, shaqaalaha ku salaysan xarunta, ama shaqaalaha daryeelka da'da dugsiga ayaa heli kara maalgelin si ay u qaataan fasalo si ay u kasbadaan dhibco kuleejka ama shahaadada associate ama shahaadada bachelor ee Horumarinta Ilmaha ama Waxbarashada Caruurnimada Hore oo laga helo kuleejka ama jaamacadda Minnesota ee la aqoonsan yahay. Deeqaha Waxbarasho ee TEACH (TEACH Scholarships) waxay daboolaan 85% kharashka waxbarashada iyo buugaagta illaa 18 (18) dhibco (credits) sanadkii. Kuwa hela deeqda sidoo kale waxay helaan gunno safar iyo waqti fasax (release time).

– Deeqda Waxbarasho ee Tababaraha Caruurnimada Hore ama Tababaraha (Coach)

Tababarayaasha (Coaches), Tababarayaasha La Ansixiyay ee Achieve (Achieve Approved Trainers), iyo ka qaybgalayaasha Akademiyada Tababaraha waxay heli karaan kaalmo maaliyadeed si ay uga caawiso kordhinta Tillaabadooda Shabakadda Shaqada (Career Lattice Step) inta ay taageerayaan goobta Caruurnimada Hore iyada oo loo marayo tababar tayo leh ama hagitaan. Kuwa hela deeqda waxay helaan gunno waxbarasho iyo \$50 (\$50) oo gunno dheeraad ah (bonus) koorso kasta oo la dhameystiro. Kaddib taariikhda dhamaadka deeqda waxbarashada, kuwa helay deeqda waxay ballan qaadaayaan inay dhigaan ugu yaraan saddex tababar oo Achieve ansixiyay muddo hal sano gudaheed ah ama inay ku sii jiraan jagadooda hagidda (coaching) ugu yaraan 2 sano.

• Empower to Educate (gunnooyin iyo maalgelin)

Iyadoo laga helayo maalgelin Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota (Minnesota Department of Children, Youth, and Families), barnaamijka **Empower to Educate** wuxuu ka caawiyaa macallimiinta Caruurnimada Hore ee hadda iyo kuwa hiigsanayaba inay horumariyaan ayna sii wataan yoolalkooda shaqo ee daryeelka carruurta. Barnaamijka horumarinta shaqaaluhu wuxuu bixiyaa taageero maaliyadeed, fursado tababar oo bilaash ah, tababar xirfado shaqo, taageero shaqo siin ah, iyo fursado is-hagid (mentorship). Ka qaybgalayaasha sidoo kale waxay taageero joogto ah ka helaan La-taliye Shaqaale oo maxalli ah.

• Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada ee North Star Promise (North Star Promise Scholarship Program)

Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada ee North Star Promise (North Star Promise - NSP) waa waddo ka caagan khidmadaha iyo waxbarashada oo loo maro tacliinta sare oo loogu talagalay dadka deegaanka Minnesota ee u qalma ee dhigta hay'adaha waxbarasho ee u qalma isagoo ah barnaamijka "doolarka ugu dambeeya" ("last-dollar") adoo daboolaya hadhaaga waxbarashada iyo khidmadaha hartay kaddib markii deeqaha kale, deeqaha gobolka, gunnooyinka, iyo ka-cafinta waxbarashada la dabaqay.

Booqo [bogga internetka ee Barnaamijka North Star Promise](#) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan u-qalmiitaanka barnaamijka iyo habka codsiga.

★ Ikhtiyaarada kale ee Taageerada Maaliyadeed

• Deeqaha heerka koobaad ee Jaamacada ee Dawlada Dhexe (Federal Pell Grants)

waxaa badiyaa la siiyaa ardayda heerka koobaad ee jaamacada kuwaas oo muujiya baahi dhaqaale ayna weli kasban shahaadada bachelor, qalin-jabin, ama shahaado xirfadeed.

• **Deeqaha Gobolka** waxay ka caawiyaan ardayda ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa dhexe inay iska bixiyaan kharashyada waxbarashada ee kuleejyada ama jaamacadaha Minnesota ee u qalma.

• **Gunnooyinka REETAIN** waxay gacan ka geystaan taageeridda dakhliga macallimiinta Caruurnimada Hore marka ay ka shaqeynayaan inay asaasaan shaqo ku saabsan goobtan. Waxaa bixiya Child Care Aware.

• **MN Reconnect** waxay siisaa ilaa \$1,000 (\$1,000) simistar kasta ardayda dadka waaweyn ah ee u qalma, iyadoo loola jeedo in laga caawiyo bixinta kharashka buugaagta, waxbarashada, ama in laga caawiyo xannaanada carruurta ama kharashka gaadiidka.

• **Deeqaha Waxbarashada ee Horumarinta Shaqaalaha (Workforce Development Scholarships)** ayaa diyaar u ah ardayda cusub ee gelaysa barnaamijyada shahaadada associate, diblooma, ama shahaadada xirfadeed. Qaddarada abaalmarinta oo ah \$2,500 (\$2,500) ama ka sarreeya. La xirii xafiiska ogolaanshaha ama gargaarka maaliyadeed ee [Kuleej Goboleedka Minnesota \(Minnesota State College\)](#) si aad wax badan u ogaato.



Macallinka Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurta Sanadaha Hore iyo Macallinka Caruurnimada Hore ee Head Start

★ St. Cloud, MN

Krisanne Forsman, MS

Wax ka Qabashada Caruurnimada Hore ee Dhalashada-3/Macallinka ECSE, Sherburne N. Wright Special Education Co-op

Krisanne waxay guryaha ku booqataa carruurta iyo qoysaskooda si ay uga caawiso kormeeridda iyo taageeridda baahiyaha korriinka. Baro sida ay isugu darto diirad-saarista waxbarashada iyo aragtida waxbarashada gaarka ah gudaha shaqadeeda.

Katelyn Maday

Macallinka Caruurnimada Hore ee Head Start, Reach Up Head Start

Katelyn waxay shaqadeeda shaqaalaha Caruurnimada Hore ku bilaabatay iyadoo isku xilqaantay xarun xannaanada carruurta ah, taas oo shaqaaleysiisay markii ay ahayd sanadka ugu dambeeya dugsiga sare. Dhagayso wax badan oo ku saabsan xiisaheeda weyn ee ku wajahan taageerada dhallaanka iyo carruurta socod-baradka ah fiidiyowgan.

“Markaan ogaado inaan saameyn ku yeelanayo noloshooda, waa wax walba oo aan rajeynayay oo aan ku riyooday waana sababta aan u jeclahay inaan shaqada imaado maalin kasta.”

– Katelyn Maday



Dhegeyso sheekooyinkooda:

Guji ama iskaan garee QR koodhka hoose si aad u daawato sheekooyinka Krisanne iyo Katelyn af-Ingiriis ama af-Isbaanish.



Fursadaha Deeqda

Waxaa jira maalgelin la heli karo oo lagu siinayo deeqo ururada dhisida shaqaalaha Caruurnimada Hore kuwaas oo si dhow u matala kororka tirada ardayda kala duwan ee gobolka waxayna xaqiijinaysaa in dhammaan ardaydu ay helaan fursad isku mid ah oo ay ku helaan macallimiin hore oo tayo sare leh.



- Kobci Waddadaada u Gaarka ah ee Dadka Waaweyn (Grow Your Own Pathway for Adults)—Waxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education)**

Waxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education) waxay leedahay barnaamij deeqeed oo hoos yimaada Xeerarka Minnesota 122A.73 oo loogu talagalay [barnaamijyada Kobci Digaada \(Grow Your Own - GYO\)](#) si loo taageero hawlaha maxalliga ah ee kordhin doona kana dhigi doona shaqaalaha macallimiinta kuwo kala duwan gudaha gobolka Minnesota. Barnaamijka:

- Wuxuu diiradda saarayaa qorista macallimiinta midabka leh (educators of color)
- Waa inuu horseedaa shatiga macallinnimo ee la ansixiyay ee Guddiga Shatiyeynta iyo Heerarka Macallimiinta Xirfadda leh ee Minnesota (Professional Educator Licensing and Standards Board - PELSB) (Caruurnimada Hore tani waxayna noqon kartaa: Shatiga Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurnimada Hore ama shatiga Dhalashada—Fasalka 3)

- Kobci Macallinkaaga Caruurnimada Hore iyo Qoyska (Grow Your Own Early Childhood and Family Educator - GYO EC&FE)—Waxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Children, Youth, and Families)**

